



Ma dooneysaa inaad wax badan  
ka ogaato SIP?

- la xiriir daryeelka caafimaadka ama  
adeegga bulshada

**SIP**


Planiin tilhör

Namn \_\_\_\_\_ Personnummer \_\_\_\_\_  
Telefon \_\_\_\_\_ Adress \_\_\_\_\_  
Ort \_\_\_\_\_ Datum, idag skriv ut planen \_\_\_\_\_

Kallade och ansvare

Namn \_\_\_\_\_ Funktion/relasjon/verksamhet \_\_\_\_\_ Kontaktpgifför \_\_\_\_\_ Dato \_\_\_\_\_





Adiga u baahan inaad isku dubarid-  
do xiriiradaada adeegga bulshada  
iyo daryeelka caafimaadka.

# SIP – Sidey taasi u sahlan tahay?

Haddii aad u baahan tahay inaad isku dabariddo xiriirkaada adeegga bulshada iyo daryeelka caafimaadka waxa taa loo sameyn karaa si sahlan iyadoo la sameynayo qorshaha isku dabaridka shaqsiyadeed (samordnad individuell plan, SIP).

SIP ayaa keenaya in adiga iyo ehelka kugu dhowi aad ka qeyb qaadataan qorshaha waxqabadka ee ka imanaya adeegga bulshada iyo daryeelka caafimaadka iyo **hagaajinta isu dabaridka iyadoo la helayo sawir guud** ee adiga, ehelka kugu dhow daryeel iyo gargaar bixiyeyaasha ay saameeyso.


Qorshaha ayaa caddeynaya waxa ay hey'adaha kala duwani mas'uulka ka yihiin iyo shaqsiyaadka xiriirka ee jira si aad u dareento amaanno.

**Mas'uuliyadda isku dabaridka howlaha baahidaada waxey saaran tahay adeegga bulshada iyo daryeelka caafimaadka. Sidaa darteed ayey SIP u jirtaa.**

# Sidan ayey wax u dhacayaan:

1

- Adiga, qof ka mida xiriirkaada daryeelka ama qof kugu dhow ehel ahaan ayaa codsan kara SIP.
- Adig ayaa ogolaanaya in SIP la sameeyo.




2

- Sida wadajir ah ayaad xiriirkada daryeel ula diyaarineysaa kulanka SIP isla markaana go'aan ku gaareysaan cidda idinkala qeyb qaadaneysa kulanka, tusaale ahaan adeegga bulshada, rugta daryeelka caafimaad, baxna-aninta, iskuulka, xafiiska ceymiska.
- Kulanka SIP waa inuu ku dhacaa **sadax to-dobaad gudahood** kadib marka baahida la arko.



3

- Kulanka SIP inta ka qeyb qaadaneysa wey ka hadli karaan. Qeyb baad ka tahay adigoona saameyn ku yeelanaya xaaladaada.
- Waxaad heleysaa **mas'uul isku duwe** ee SIP-kaada.



4

- Wixi lagu heshiiyo ee kulanka SIP-ka waxa lagu qorayaa qorshaha loogu yeero SIP.
- **Waa dokumenti idinka wada dhaxeeyo, xataa kaada ah**, si loo ogaado waxa lagu heshiiyey isla markaana loola socon karo sidey wax u dhacayaan.

